STATE OF COLORADO

# Tilmaamaha Ku aadan Sharciyaynta Shaqsiga ah ee Ganacsiga Muhiimka ah

Amarka Fulinta ee tirsigiisu yahay D 2020 017 “Oo Amraaya dadka reer Colorado Inay Guriga Joogaan Sabab La xariirta Jiritaanka cudurka COVID-19 oo Gobalka soo gaaray,” iyo Amarka Kaas Lamid ah ee Waaxda Caafimaadka (Public Health) 20-24 Amarka Wax laga Badalay ee Public Health 20-24 (PHO 20-24) marka laga reebo ganacsiyada muhiimka ah Fadlan arag PHO 20- 24 si aad u hesho liiska buuxa ee hadda ah ee ganacsiyada la siiyay fasaxa.

Shirkadaha loo shaqeeyo waa inay sameeyaan qaab ay ugu sahlaan shaqaalaha inay shaqeeyaan ayagoo guriga jooga ilaa macquulka ah ee suuraglka ah. Ku dhaqanka Shuruudaha Kala fogaanshaha Dadka ee Gobalka oo dhan ayaa muhiim ah si looga hortago in cudurku COVID-19 uu faafo. Shirkadaha loo shaqeeyo waa inaysan ka faa'iidaysan shaqooyinka ganacsiga ee muhiimka ah si ay usoo galiyaan shaqaale dheeraad ah oo ka badan kuwa gabi ahaanba muhiimka u ah fulinta shaqooyinka muhiimka ah ee gobalkeenu u baahan yahay.

Si waafaqsan, haddii ganacsigu muujiyo inuu yahay mid muhiim ah si waafaqsan shardiga Amarka ku jira, markaas waa la fasaxayaa, ayadoo la saaraayo xadidaado gaar ah, oo ku cad amarka PHO 20- 24. Shaqaalaha ka shaqeeya ganacsiyada muhiimka ah waxay lahaan karaan masuuliyad qaas ah oo ka saaran ilalainta jadwalka shaqadooda waxaana loo fasixi karaa inay qabtaan shaqooyinka muhiimka u ah ganacsiga sida ay ogolaadaan hogaankoodu. Sidaas awgeed, socdaalka lagu aado loogana yimaado ganacsiga muhiimka ah ayaa sidoo kale lagu fasaxayaa amarka PHO 20- 24. Darawalada iyo shaqaalaha ganacsiyada muhiimka ah ayaa u adeegsan kara dukumiintigaan iyo dukumiinti kasta oo taageeraaya inay shaaciyaan inay u shaqeeyaan ganacsi muhiim ah ayna fasax u haystaan inay qabtaan shaqo ama adeegga muhiim ah. Socdaalka muhiimka u ah fulinta shaqooyinka kooban ee muhiimk ah eeganacsiga ayaa sidoo kale la fasaxayaa.

Fadlan ogoow in liiska lifaaqa ku jira uu qeexaayo shaqaalaha qabta shaqooyinka kaladuwan iyo adeegyada muhiimka u ah sii wadista shaqada ganacsiga muhiimka ah, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn; xarumaha hawlaha hawlgalada shaqaalaha, ilaalinta iyo dayactirka kaabayaasha muhiimka ah, ka shaqaynta xarumaha wicitaanka, iyo qabashada shaqooyinka maamulka, iyo kuwo kale. Shirkadaha ay ka shaqeeyaan ayaa kala ah, laakiin qasab maaha inay intaas ku koobnaadaan; shaqooyinka daryeelka caafimaadka, kabayaasha muhiimka ah, wax soosaarka muhiimka ah, tafaariiqda muhiimka ah, adeegyada muhiimka ah, saxaafada wararka, xarumaha dhaqaalaha, xarumaha baxsha aasaasiyadka dhaqaalaha ee la siiyo dadka danyarta ah, dhismaha, difaaca, adeegyada muhiimka u ah ilaalinta badqabka, nadaafada iyo shaqooyinka muhiimka ah ee deegaanada ama ganacsiyada kale ee muhiimka ah, adeeg bixiyaasha baxsha adeegyada muhiimka ah ama badeecooyinka ayna ku jiraan gaadiidka iyo taageerada tignooloojiyada, iyo adeegyada daryeelka carruurta.

Ayadoo bulshooyinka deegaanku ay ka baaraan dagayaan xanibaadaha ka dhashay COVID-19, Gobalka Colorado wuxuu bixinayaa dukumiintigaan si looga caawiyo aqoonsiga ganacsiyada iyo shaqaalaha taageera qaybaha kaabayaasha muhiimka ah iyo isu socodka muhiimka ah iyo qaadista badeecooyinka iyo bixinta adeegyada.

Waxaa intaad dheer, qaybahaan ganacsiga ee la aqoonsaday iyo shaqaalaha ka shaqeeya, ayaa ah tusaalayaasha shaqooyinka muhiimka ah ee sii socon doona inta lagu jiro gurmadka COVID-19. Saraakiisha maxaliga ah waa inay adeegsadaan fikirkooda shaqsiga ah iyo awoodooda maamul si ay u fuliyaan talona uga baxshaan amarka. Si taas lamid ah, iskaashatada ganacsiyada kaabayaasha muhiimka ah waa inay adeegsadaan caqligooda, ayagoo kaa shanaaya liiska, si ay usii wadaan shaqooyinka muhiimka u ah kaabayaasha adeegyada iyo shaqooyinka. Dhammaan go'aanadu waa inay si wanaagsan iskugu dheeli tiraan badqabka bulshada ayagoo xaqiijinaaya inay sii wadaan bixinta kaabayaasha aasaasiga ah ee adeegga iyo shaqooyinka.

Waa muhiim inaad ogaato, dukumintigaan waa mid ikhtiyaari ah mana ahan amar kusoo baxshay shardi gobal waxaana kaliya loo abuuray in la caawiyo labadaba aganacsiyada muhiimka ah iyo laamaha sharci fulinta si ay u raacaan amarada caafimaadka bulshada. Sidaas awgeedna, inaan dukumiintigaan la haysan kama dhigna inaan lagu dhaqmayn amar kasta oo kasoo baxa gobalka. Isla waqtigaas, maadaama ay tahay cadayn aad iskaa isku

siinayso, joogista kaliya dukumiintigu ma qasbayso in lagu fasaxo. Waraaqdu marna ma daarna inay fasaxdo ku xad gudubka socdaalka ama lagu xad gudbo badqabka dadka.

**Gaadiidka La xariira Shaqada Ganacsiga Haysta Cadaynta inuu Muhiim yahay**

Magaca Ganacsiga:________________________________________

Ciwaanka Ganacsiga: ______________________________________

Mulkiilaha Ganacsiga: _____________________________________

Magaca Qofka buuxinaaya foomkaan:________________________

Darajada Qofka buuxinaaya foomkaan:______________________

Macluumaadka Xiriirka: ___________________________________

Ganacsiyada muhiimka iyo shaqooyinka dawlada ee muhiimka ah, sida hoos lagu qeexay, waxaa laga dhaafayaa amarka PHO 20-24. Dhammaan ganacsiyada muhiimka ah waxaa lagu talinayaa inay furnaadaan. Ganacsiyada muhiimka ah waa inay raacaan shuruudaha kala fogaanshaha bulshada.

**Ganacsiga Muhiimka** -Ganacsi kasta, ayna ku jiraan nooc kasta oo ganacsi ama khayri ah, ayadoon laga eegayn naqshadiisa ganacsi, oo ka sahqeeya shaqooyinka ganacsiga, wax soo saarka, ama adeegga hoos ku qoran, ayaa sii wadi kara inuu shaqeeyo sidii caadiga ahyd. Ganacsiyada muhiimka ah waa inay raacaan tusmada iyo tilmaamaha ilalainta nadaafada iyo badqabka goobta shaqada ee ay soo saartay CDPHE iyo waax kasta oo caafimaad o shaqadaan ku lug leh. Ganacsiyada muhiimka ah waa inay raacaan shuruudaha kala fogaanshaha bulshada iyo dhammaan PHO yada hadda shaqaynaaya ila heerka ugu sareeya ee macquulka ah ayna iskula xisaabtamaan raacista arintaas. Ganacsiyada muhiimka ah KUMA jiraan xarumaha caafimaadka sida lagu qeexay C.R.S. § 6-1-102(4.6), jiimamka jimicsiga iyo jir dhiska, iyo xarumaha la midka ah, ama ganacsiyo kasta oo kaleoo loogu baahan yahayinay xidho PHO 20-22.

Hubi shaqada ganacsiga ee Ugu muhiimsan ee ganacsigaagu qabto:

- ☐ Shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka
- ☐ Kaabayaasha Muhiimka ah
- ☐ Wax soo saarka Muhiimka ah
- ☐ Tafaariiqda Muhiimka ah
- ☐ Adeegyada Muhiimka ah
- ☐ Saxaafada Wararka
- ☐ Xarumaha Dhaqaalaha
- ☐ Adeeg Bixiyaasha Aasaasiga ah ee Muhiimka u ah Dadka Danyarta ah
- ☐ Dhismaha
- ☐ Difaaca
- ☐ Adeegyada Muhiimka ah ee Loogu Baahan yahay Ilaalinta Badqabka, Nadaafada iyo Shaqooyinka Muhiimka ah ee Dadka Deegaanka iyo Ganacsiyada Kale ee Muhiimka ah
- ☐ Adeeg bixiyaasha baxsha adeegyada muhiimka ah ama badeecooyinka, ayna ku jiraan gaadiidka iyo taageerada tignooloojiyada, iyo adeegyada daryeelka carruurta

Nooca Ganacsiga:____________________________________________________________

Saxiixa. ______________________________________________